Caafimaadka iyo Badqabka/Ka-hortagga Dhibaataynta ee IP-ga

Consumer Direct Care Network Washington (CDWA) uma dulqaadato dhibaataynta, takoorka, dhaqanka aflagaada ah, ama rabshadaha goobta shaqada ee lagula kaco Adeeg Bixiyeyaasha Shaqsiga Ah. Dhammaan noocyada dhibaataynta, oo ay ku jiraan wixii eray ama ficil ah ee lagula kaco shaqsi ama isirka, midabka, diinta, nooca jinsiga, aqoonsiga jinsiga, asal qaranka, da'da, naafonimada, macluumaadka hide-sidaha, xaaladda guurka ee shaqsiga, ama sifo kasta oo kale oo uu ilaaliyo sharciga ayaa mamnuuc ah. Shirkadeena waxaa ka go'an in la helo goob shaqo oo ka madaxbanaan dhibaatayn, takoor, dhaqanka aflagaada ah, ama rabshadaha goobta shaqada.

Dhammaan shaqaalaha, Macaamiisha, iyo Wakiilada La Oggolyahay waxaa laga filayaa inay qaadaan tallaabooyinka habboon si ay uga hortagaan dhibaataynta, takoorka, dhaqanka aflagaada ah, ama rabshadaha goobta shaqada. Shaqaalaha waxaa laga filayaa inay soo wargeliyaan dhacdooyinka ay goob-jooga u noqdaan, loo soo gudbiyo, ama ay la kulmaan, sida ugu dhaw taariikhda uu falka dhacay ee suurtogalka ah. CDWA waxay mamnuucday in aargoosi lagula kaco shaqsi kasta oo si daacadnimo ku jirto warbixin u soo gudbiya. Qof walbo oo ah shaqaale, Macmiil, ama Wakiilka La Oggolyahay ee la ogaado inuu ku lug yeeshay dhibaatayn, dhaqanka aflagaada ah, ama rabshadaha goobta shaqada wuxuu la kulmi doonaa tallaabada edbinta ee habboon, oo ay ku jirto ama la gaarsiinayo shaqo joojinta.

UJEEDDO

Dhammaan shaqaalaha, Macaamiisha, iyo Wakiilada La Oggolyahay waxaa dabaro oo laga filayaa inay u hoggaansamaan Qaynuunkan iyo inay qaadaan tallaabooyin habboon si loo xaqiijiyo in dhaqanka la mamnuucay uusan dhicin.

BAAXADA

Dhammaan shaqaalaha, Macaamiisha, iyo Wakiilada La Oggolyahay ee Consumer Direct Care Network Washington.

QEEXITAANADA

Qadka Taleefoonka Tooska ah ee Soo Wargelinta Dhaawaca & HAD ee CDWA

1 (877) 532-8542

Dhaqanka aflagaada ah/Rabashada goobta shaqada

Ficilada rabashadaha waxaa ka mid ah balse aan ku koobnayn: dhibaataynta ama xadgudubka hadalka ah ama jirka, iskudayga cabsi-gelinta, duminta, burburinta hantida, baaqyada halista ah, haysashada hubka, dabagalida qofka, khasbida, riixida ama kala-tuurida, ciyaar doqomeeda, ama ficilada kale ee cadowtinimada ah, gardarrada ah, waxyeelada leh iyo kuwa wax burburinaya.

Dabeecadda Caqabadda leh

Dabeecadda caqabadda leh looma tixgeliyo dhibaatayn, takoor, ama rabshadaha goobta shaqada haddii ay ka dhigan tahay dabeecadda Macmiilka ee si gaar ah ku timid sababta ama la xiriirta naafonimo laga yaabo inuu kula kulmayo IP-ga sida inay tahay gardarro ama inay keenayso khatar badqab.

Dhibaateynta

Hadal aan fiicnayn, muqaal, ama dhaqan muuqda oo abuura cabsi gelin, wareer, ama jawi colaadeed kuwaas oo farageliya shaqo qabashada. Dhibaataynta waxay noqon kartaa mid afka ah (ay ku jiraan cay, kaftan, aflagaado, meedaaro, ama jeesjees), sawir (ay ku jiraan boodhadh aflagaado ah, astaamo, kartoonno, sawiro, bandhig kombuyuutar, iimaylo, ama wax la soo dhigo baraha bulshada), ama dhaqan jireed (ay ku jiraan in jir ahaan qof kale loogu hanjabo, wado ka xirida qof kale, iwm.) kuwaa oo hoos u dhigaya ama muujinaya cadaawad ama nacaybka loo qabo shakhsiga. Dhaqanka noocaas ah wuxuu jebinayaa qaynuunkan, xitaa haddii aysan ahayn sharci darro.

Dhibaateynta Galmada

Dhaqanka galmada ee weerarka ah ee aan la rabin ee lagu bartilmaamedsanayo shaqsiga (yada). Dhibaateynta galmada waxaa ka mid noqon kara dhammaan ficilada kore, iyo sidoo kale dhaqanka aan raaliga laga ahayn, sida dhaqdhaqaaqa galmada aan raaliga laga ahayn ama aan la codsanin, codsiyada galmada, iyo dhaqanka kale ee hadalka, muuqaalka ama jirka ah ee galmada ku salaysan. Tusaalayaasha dhibaateynta galmada waxaa ka mid ah, balse aan ku koobneyn:

- Xodxodashada, taabashada, dhaqdhaqaaqa, ama soo jeedinta galmada ee aan raaliga laga ahayan;
- Xadgudubka afka ee asal ahaan galmada ku saleysan;
- Faalooyinka sawirka ah ama soojeedinta leh ee ku saabsan dharka, jirka, ama jinsiga qofka;
- Hadalada galmada sharaf-dhaca ah oo lagu tilmaamo qof; ama
- Muujinta shay'yaasha ama sawirada soojeedinta galmada leh, oo ay ku jiraan sawirada qaawan.

HABRAACA

1. Waxbarashada iyo Kahortagga

   1.1. CDWA waxay waxbarasho iyo agab siisaa Macaamiisha, IP-yada, iyo kooxaha oo ku saabsan ka hortagga, wax-ka-qabashada, ka warbixinta iyo baaritaanka dhibaataynta, takoorka, dhaqanka xadgudubka ah, iyo rabshadaha goobta shaqada.

   1.1.1. Qaynuunka waxaa lagu dhejiyay goobo caan ah oo ku dhexyaal dhismayaasha CDWA,

   1.1.2. Qaynuunka waxaa la siiyaa dhammaan IP-yada cusub marka la shaqaaleysiiyo iyo sannad kasta ka dib, iyo

   1.1.3. Qaynuunka waxaa lagu heli karaa Ingiriisi iyo saddexda luqadood ee ugu badan ee ay ku hadlaan IP-yada.

1.2. CDWA waxa ay joogtaysaa qorshe ka hortag ah si:

1.2.1. Looga hortago oo looga ilaaliyo shaqaalaha dhaqanka xadgudubka ah,

1.2.2. Looga caawiyo shaqaalaha deegaanada leh dabeecaddaha caqabadda leh, iyo

1.2.3. Si looga shaqeeyo in xal loo helo arrimaha saamaynta ku leh bixinta adeegyada.

1.3. Qorshaha ka hortagga ah waxaa:

1.3.1. Diyaariyo oo la socda guddiga Badqabka Goobta Shaqada.

1.3.1.1. Guddiga Badqabka Goobta Shaqada wuxuu ka kooban yahay shaqsiyaad ay doortaan shaqaalaha, uu soo xusho loo-shaqeeyaha, waxaana ku jiro ugu yaraan hal Macmiil iyo/ama Wakiilka La Oggalyahay.

1.3.2. Dib loo eegaa marki loo baahdo iyo ugu yaraan hal mar saddexdii sanaba.

2. Soo Wargelinta

2.1. IP-ga rumaysan si daacadnimo ay ku jirto in caafimaadkooda iyo/ama badqabkooda ay khatar kaga soo wajahan tahay goobta shaqada ee lagu qoray ayaa ka soo tagi karo goobtaas isla markaasba oo la soo xidhiidhi kara Qadka Taleefoonka Tooska ah ee Soo Wargelinta Dhaawaca & HAD ee CDWA. Haddii IP-ga uu rumaysan yahay in Macmiilka uu khatar ku jiro, IP-ga ayaa wici doona 9-1-1 ama adeegyada kale ee gargaarka degdegga ah.

2.1.1. Hannaanka waa inuusan fasaxin ka tagida sida lagu qeexay RCW 74.34.020 marki laga reebo in IP-ga uu waco Qadka Taleefoonka Tooska ah ee Soo Wargelinta Dhaawaca & HAD oo uu cabsi macquul ah ka qabo waxyeello jireed oo ku soo wajahan.

2.2. Shaqaale kasta oo hela warbixin ama rumaysan inuu jiro qof ku xad-gudbay qaynuunkan waa inuu si degdeg ah u wargeliyo arrinka wakiilka CDWA (maamulaha ama qof ka sarreeya). Warbixinnada waxaa lagu soo gudbin karaa hadal ahaan ama qoraal ahaan waxaana lagu soo gubin karaa si qarsoodi ah haddii shaqaalaha uu rabo.

2.3. Haddii kormeeraha ama xubin ka mid ah maamulka ay ogaadaan walaacaa shaqaale kasta ee ku saabsan ku xadgubida qaynuunkan, haddii ay tahay cabasho rasmi ah ama si aan rasmi ahayn, waa inay isla markaaba arrimaha loo soo sheegay ku wargeliyaan qofka ay ka amar qaataan, maamule kale, ama Wakiilka HR.

3. Baaritaanka

3.1. Wakiilka CDWA (maamulaha ama qof ka sareeya) ayaa bilaabi doona baaritaan dhamaystiran oo dhexdhexaad ah oo ku saabsan xaqiiqooyinka iyo marxaladaha ku xeeran cabasho kasta 3 maalmood oo shaqo gudahood.

3.2. Inta uu socdo baaritaanka, wakiilka CDWA ayaa guud ahaan:

3.2.1. Waraysan doonaa dacwad-oogaha, bartilmaameedka (haddii aanu ahayn dacwad-oogaha), markhaatiyaasha, dembiilaha lagu eedeeyay, iyo cid kasta oo kale oo ay khusayso,

3.2.2. Uruurin doona bayaanada qoraalaka ah ee la saxeexay iyo dukumiintiyada la xiriira sida ugu habboon,

3.2.3. Diiwaangelin doona tallaabooyinka la qaaday iyo natiijada baaritaanka, oo

3.2.4. U gudbin doona go'aanka baaritaanka dhinacyada ku habboon oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn:

3.2.4.1. Macmiilka,

3.2.4.2. Wakiilka La Oggalyahay,

3.2.4.3. Adeeg Bixiye Shaqsiyadeed, iyo/ama

3.2.4.4. Maalmulaha Kiiska.

3.3. Marka baaritaanka la dhameeyo tallaabooyinka edbinta oo degdeg ah una dhigma ayaa la qaadi doonaa.

3.3.1. Shaqaalaha CDWA tallaabooyinka waxaa ka mid noqon doona tallaabooyinka edbinta ee heerka habboon. Tallaabooyinkan waxaa ka mid ah, balse aan ku koobneyn:

3.3.1.1. Shaqaalaha oo dib ugu tabbabaranaya ka hortagga ficilada la mamnuucay,

3.3.1.2. La-talinta xirfadaha,

3.3.1.3. Qorshayaasha tallaabada edbinta, iyo/ama

3.3.1.4. Shaqo ka joojinta shaqaalaha.

3.3.2. Haddii Macmiilka, Wakiilka La Oggalyahay, ama xubnaha qoyska Macmiilka ama soo booqdayaasha ay ku lug yeeshaan dhaqan la mamnuucay CDWA ayaa qaadi doonta tallaabooyinka edbinta ee habboon kuwaas oo ay ka mid noqon karaan, balse aan ku koobnayn:

3.3.2.1. Dib ugu tabbabarida macmiilka ka hortagga ficilada la mamnuucay,

3.3.2.2. Taageerada wax-ka-qabadka ee Maalmulaha Kiiska,

3.3.2.3. U bandhigida macluumaadka sida xanuunka, dabeecaddaha, taariikhda dhibaataynta, takoorka, xadgudubka, ama rabshadaha (marki laga reebo inuu sharciga mamnuucay) IP-ga xiga iyo/ama

3.3.2.4. Ka joojinta adeegyada CDE.

3.4. CDWA ayaa la shaqayn doonta IP-yada dhibanayaasha u noqday dhibaataynta, dhaqanka aflagaada ah, rabashadaha goobta shaqada, iyo dabeecadda caqabadda leh iyada oo:

3.4.1. U gudbinaysa IP-yada khayraadka bulshada ee habboon,

3.4.2. Ka caawinaysa IP-ga in loo wareejiyo Macmiil kale (haddii loo baahdo),

3.4.3. Wada-shaqayn la sameynayso sharci fulinta, oo

3.4.4. Siinaysa hannaan xog-wareysi IP-yada la saameeyay ka dib ficil gardarro ah.

3.5. Haddii shaqaalaha uu ku qanci waayo xallinta dacwadooda, waxay xaq u leeyihiin inay dacwad u gudbiyaan hay'adda dawladda ee ku habboon.

3.6. CDWA ayaa la shaqayn doonta Maalmulayaasha Kiiska inta baaritaanka uu socda oo dhan si loo joogteeyo shaqada marka:

3.6.1. Eedeynta ay la xiriirto dabeecadda caqabadda leh ee macmiilka,

3.6.2. Macmiilka uu halis ugu jiro inuu waayo IP adeegyo siiyo, iyo/ama

3.6.3. Marka Macmiilka uu halis ugu jiro in laga joojiyo adeegyada CDE.

4. Diiwaanada dhacdooyinka la soo gudbiyay waxaa la hayn doonaa ugu yaraan shan (5) sano waxaana loo diyaarin doonaa inay baaritaan ku samayso DSHS ama wakiiladeeda, marka la codsado.

5. Sida uu qabo Qaynuunka Aargoosi La'aanta/Sir-dusiyaha ee CDCN, ma jiro shaqaale lagu soo rogi doono, waxaana mamnuucday CDWA, nooc walbo oo tallaabada edbinta ah ama aargoosi inuu soo wargeliyay xadgudubyada loo arko in loo gaystay qaynuunkan aawadeed, daba-galida dacwad kasta oo noocaas ah, ama kala shaqaynta qaab kasta ee baaritaanka dacwada noocaas ah. Haddii shaqaale uu rumaysan yahay inuu jiro qof jabiyay Qaynuunka Aargoosi La'aanta, shaqaalaha waa inuu isla markaaba arrinta soo wargeliyo Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Shaqaaleynta ama Sargaalka U Hoggaansanaanta.

Ka hortagga dhibaataynta iyo abuurista goob shaqo oo madani ah oo ixtiraam leh ayaa ah masuuliyad qof kasta saaran. Soo wargelinta degdegga ah ee dhibaataynta la arkay ama lala kulmay waxay awood noo siinaysaa inaan si degdeg ah u xallino dhibaatooyinka marka ay soo baxaan.

XAKAMAYNTA GUDAHA

Dhammaan shaqaalaha waxaa laga filayaa inay u hoggaansamaan Qaynuunkan. Agaasimeyaasha Waaxda Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Gobalka ayaa mas'uul ka ah u hoggaansamida guud ee Qaynuunka. Guddiga Badqabka Goobta Shaqada ayaa mas'uul ka ah dib-u-eegida iyo soo wargelinta loo baahan yahay ee inta jeer, sababaha, iyo cawaaqib-xumada ka dhalan karta takoorka iyo dhaqanka xadgudubka ah ee la soo wargeliyo. La socoshada u hoggaansamida qaynuunkan ayaa noqon doonta mas'uuliyada Agaasimaha QM ee WA iyada oo loo marayo wareegyada dib u eegista joogtada ah ee lagu qeexay Qorshaha Maareynta Tayada CDWA.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Agabyada Habboon:	Heshiiska Gorgortanka Lagu Galay ee SEIU Client Co-employment Handbook (Buug–gacmeedka Mas'uuliyad-Wadaaga Macmiilka) IP Employment Handbook (Buug–gacmeedka Shaqaalaynta IP-ga)
Sharciyada Habboon:	SB 6205 RCW 49.95
Kooxda(Kooxaha) Qaynuunka:	Waaxda Shaqada iyo Shaqaaleynta Shaqooyinka
Khabiirka Mawduuca Laga Hadlayo:	Agaasimaha Waaxda Shaqada iyo Shaqaaleynta iyo Gobalka
Gobalada Ay Khuseyso:	Washington
Hay'addaha Ay Khuseyso:	Consumer Direct Care Network of Washington
Jadwalka Dib U Eegista Qaynuunka:	Labadi Sano Mar
Taariikhda La Ansixiyay:	5/16/2023
Taariikhda Qaynuunka:	Markay ahayd Maarso 17, 2021, ayaa Qaynuunkan waxaa ansixiyay WA DSHS. Markay ahayd Maajo 16, 2023, Qaynuunkan waxaa loo cusboonaysiiyay in lagu daro hannaanada hadda jira.